



Qiyaasta Darajada Guud ee Koorsooyinka Bilowga ah

Qiyaasta darajada Guud oo hoos ku muujisan waxaa loo adeegsadaa in looga warbixiyo waxqabadka ardayga ee marxaladda bilowga sannadka 6aad (Preliminary Stage 6 year) ee dhammaan dugsiyada NSW.

Qiyaasta darajada Guud waxay sheegaysaa waxqabadka mid kasta ee shanta heerarka darajo.

Darajda	Qiyaasta Darajada Guud ee Koorsooyinka Bilowga ah
A	Ardaygu wuxuu muujiyaa aqoon ballaaran ee mowduuca iyo garashada fikradda guud ee koorlada, wuxuuna ku adeegsadaa xirfado iyo nadaamyo sare mowqifyo kala duwan. Intaas waxaa dheer, ardaygu inuu muujiyo xirfadaha hal-abuurka leh iyo garashada naqdiyeed asagoo adeegsanaya garasho kala-hufid iyo qiimayn ah. Ardaygu wuxuu si wax ku u gudbiyaa fikrado iyo macluumaad kakan.
B	Ardaygu wuxuu aqoon ku muujiyaa mowduucyada iyo garashada fikradda guud ee koorlada, wuxuuna ku adeegsadaa xirfado iyo nadaamyo horumarsan mowqifyo kala duwan. Intaas waxaa dheer, ardaygu inuu muujiyo xirfadaha hal-abuurka leh iyo garashada naqdiyeed asagoo adeegsanaya garasho kala-hufid iyo qiimayn ah. Ardaygu wuxuu si cad u gudbiyaa fikrado iyo macluumaad kakan.
C	Ardaygu wuxuu muujiyaa aqoon sugan ee mowduucyada iyo garashada fikradda guud ee koorlada, wuxuuna ku adeegsadaa xirfado iyo nadaamyo mowqifyo uu aqoon u leeyahay. Intaas waxaa dheer, ardaygu wuxuu muujiyaa xirfadaha uu ku kala doorto kuna kala sooco macluumaadka wuxuuna u gudbiyaa fikradaha quseeya si hufnaan leh.
D	Ardaygu wuxuu muujiyaa aqoonta asaasiga ah ee mowduucyada iyo garashada fikradda guud ee koorlada, wuxuuna ku adeegsadaa xirfado iyo nadaamyo mowqifyada qaarkood uu aqoon u leeyahay. Intaas waxaa dheer, ardaygu wuxuu muujiyaa xirfadaha uu ku kala doorto kuna kala sooco macluumaadka wuxuuna u gudbiyaa fikradaha si fashiraad ah.
E	Ardaygu wuxuu muujiyaa aqoon bilow ah ee mowduucyada iyo garashada fikradda guud ee koorlada, wuxuuna adeegsadaa xirfadaha iyo nadaamyada qaarkood asagoo la tilmaamayo. Intaas waxaa dheer, ardaygu wuxuu muujiyaa xirfadaha bilowga ah ee uu ku kala garto macluumaadka kuna gudbiyo fikradaha.

Grade	Common Grade Scale for Preliminary Courses
A	The student demonstrates extensive knowledge of content and understanding of course concepts, and applies highly developed skills and processes in a wide variety of contexts. In addition the student demonstrates creative and critical thinking skills using perceptive analysis and evaluation. The student effectively communicates complex ideas and information.
B	The student demonstrates thorough knowledge of content and understanding of course concepts, and applies well-developed skills and processes in a variety of contexts. In addition the student demonstrates creative and critical thinking skills using analysis and evaluation. The student clearly communicates complex ideas and information.
C	The student demonstrates sound knowledge of content and understanding of course concepts, and applies skills and processes in a range of familiar contexts. In addition the student demonstrates skills in selecting and integrating information and communicates relevant ideas in an appropriate manner.
D	The student demonstrates a basic knowledge of content and understanding of course concepts, and applies skills and processes in some familiar contexts. In addition the student demonstrates skills in selecting and using information and communicates ideas in a descriptive manner.
E	The student demonstrates an elementary knowledge of content and understanding of course concepts, and applies some skills and processes with guidance. In addition the student demonstrates elementary skills in recounting information and communicating ideas.